OGALAASHO

CONSENT

OGEYSIIS KU SOCDA MACAAMIISHA: Qaybta Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadku (Department of Social and Health Services) (DSHS) waxay adeegga ay kuu qabato sii wanaajin kartaa haddii aanu awoodi karno in aanu la shaqeyno hay'adaha iyo xirfadleyda kale ee yaqaana adiga iyo qoyskaaga. Marka aad saxeexdid warqadan, waxa aad ogalaasho u siinaysaa DSHS, hay'adaha iyo dadka hoos ku qoran inay isticmaalaan wadaagaanna war qarsoodi ah oo adiga kugu saabsan. DSHS kuuma diidi karto gargaar ama kaalmo haddii aanad saxeexin warqadan haddii aan ogalaashahaaga loogu baahnayn in go'aan lagaga gaadho in gargaarku (kaalmadu) kuu banaan yahay iyo in kale. Haddii aanad saxeexin warqadan, waxa wali iman karta in DSHS ay cid kale la wadaagto warka ilaa xadka u sharcigu ogolyahay. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan sida DSHS ay cid kale ula wadaagto warka qarsoodiga ah ama aad qabtid su'aal ku saabsan xuquuqdaada asturnaanta, fadlan akhriso Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee DSHS (DSHS Notice of Privacy Practices) ama weydii qofka ku siinaya warqadan.

AQOONSIGA QOFKA:

MAGACA	TAARIIKHDA DHALASHADA	LAMBARKA AQOONSIGA

ADREESKA	MAGAALO	GOBOL	FURE (ZIP)

TELEEFONKA (KU DAR FURAHA)	WAR KALE

OGALAASHO:

Waxan ogalaaday in la isticmaalo warka qarsoodiga ah ee igu saabsan oo lagu isticmaalo gudaha DSHS si loo qorsheeyo, loo bixiyo, la iskuna duwo adeegyada, daweynta, bixinta, iyo faa'iidooyinka la i siiyanayo ama ulajeedooyin kale oo u sharcigu fasaxay. Waxa kale oo aan ogalaasho u siiyay DSHS iyo hay'adaha, adeeg-bixiyeyaasha, ama dadka hoos ku qoran inay isticmaalaan warkayga qarsoodiga ah isla markaana ay iyagu isu gudbiyaan warkaa iyadoo sababtu tahay isla ulajeedooyinkaa. Warka waxa loo wadaagi karaa hab ah af ka-sheegid, isu-gudbin war kombiyuutar, warqad boosta lagu diro, ama gacan ka-saar ah.

Fadlan sax saar dhamaan kuwo hoose ee lagu daray ogalaashahan ee ka baxsan DSHS oo iyadu ogalaashaha ku jirta isla markaana qor magaca iyo adreeska kuwa aad ogalaashaha ku daraysid:

- ☐ Bixiyeyaasha daryeel caafimaad: _____
- ☐ Bixiyeyaasha daryeel caafimaad maskax: _____
- ☐ Bixiyeyaasha adeeg siiya balwadle kiimiko isticmaala: _____
- ☐ Adeeg-bixiyeyaasha kale ee DSHS ay qandaraas siiyay: _____
- ☐ Barnaamijyada Guryaha: _____
- ☐ Maamulka dugsiyada ama koleejyada: _____
- ☐ Qaybta Asluubta/Xabsiyada: _____
- ☐ Qaybta Sugnaanta Shaqada (Employment Security Department) iyo shuraakadeeda shaqada: _____
- ☐ Maamulka Sugidda Bulshada (Social Security Administration) ama xafiis kale oo federalka ah: _____
- ☐ Eeg liiska halkan la socda
- ☐ Cid kale:

Waxan fasaxay ogalahayna in la wadaago diiwaanadan/faylashan iyo warkan soo socda (sax saar inta haboon oo dhan):

- ☐ Dhamaan faylashayda macmiil
- ☐ Faylasha ku qoran liiska halkan la socda
- ☐ Faylasha soo socda kaliya
  - ☐ Taariikhda qoyska, bulshada iyo shaqada
  - ☐ Warka daryeelka caafimaadka
  - ☐ Qorsheyaasha daweynta ama daryeelka
  - ☐ Faylasha wax-siinta
  - ☐ Qiimeyn Qofka u gaar ah
  - ☐ Dugsiga, waxbarasha iyo tabobarka
  - ☐ Wax kale (qor):

FADLAN U FIIRSO: Haddii diiwanadaada/faylashaada macmiilka u ku jiro mid ka mid ah warkan soo socda, waa inaad buuxisid qaybtan si diiwaanada ama faylasha loogu daro.

Waxan ogalahay in la bixiyo faylashan ama diiwanadan soo socda (sax saar inta haboon oo dhan):

- ☐ Caafimaadka maskaxda
- ☐ Natiijooyinka baadhitaanada, cilad-sheegidda, ama daweynta HIV/AYDHIS iyo Cudurada Galmada (STD)
- ☐ Diiwaanada Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha (42 CFR Qaybta 2)

- Ogalaashahani wuxu jiri doonaa ☐ hal sanno ☐ in alaale inta ay DSHS ay u baahan tahay faylasha, ama ☐ ilaa _____ (qor taariikhda ama dhacdada).
- Waxan xaq u leeyahay inaan ogalaashan joojiyo ama ka noqdo wakhti kasta anoo qoraal taa ka ku sheegaya, laakiin taasi ma saameyn doonto warka hore loo wadaagay.
- Waxan fahamsanahay in faylasha la wadaago iyadoo la adeegsanayo ogalaashahan ay dhici karto inaanay ku dhawrsanayn sharciga khuseeya DSHS.
- Koobiga ama nuqulka warqadan laga sii sameeyay waa sharci waxana u cadeynayaa inaan ogolahay in la wadaago faylasha.

SAXEEX	TAARIIKH	SAXEEXA QAABILSANAHA HAY'ADDA/MARKHAATI	TAARIIKH

SAXEEXA WAALIDKA AMA WAKIILO KALE (HADDAY JIRAAN)	TELEEFONKA (KU DAR FURAHA)	TAARIIKH

Haddii aanan ahayn qofka ka iska leh faylasha, waxan amar u haystaa inaan saxeexo sababtoo ah waxan ahay: (soo raaci cadeynta amar-hayshada)

☐ Waalid ☐ Masuul Sharci (soo raaci amarka maxkamadda) ☐ Wakiil gaar ah ☐ Wax kale:

OGEYSIIS KU SOCDA HELAYAASHA WARKA: **Haddii faylashan u ku jiro war ku saabsan HIV, Cudurada Galmada (STD), ama AYDHIS, laguuma ogala inaad sii bixisid warkan iyadoo aan ogalaasho gaar ah laga haysan macmiilka.** Haddii aad heshay war ku saabsan **isticmaali-xumidda daroogo ama aalkolo** u isticmaalay macmiilku, waa inaad marka aad sii bixinaysid warka ku sii dartid hadalkan soo socda sida u kalifayo xeerka 42 CFR 2.32:

Warkan waxa lagaa soo siiyay faylal u asturnaantooda ilaalinayo xeerka asturnaanta ee Federalku (42 CFR part 2). Xeerarka Federalka ayaa mamnuucaya inaad warkan adigu sii bixisid iyadoo aan qofka warku khuseeyo laga haysto ogalaasho cad oo ah qoraal mooyaane ama aanay jirin si kale oo u ogolyahay xeerka 42 CFR part 2. Si ulajeedadan loo oofiyo LAMA aqbali karo in lagu qanco amar-siin guud oo loogu talogalay bixinta war caafimaad ama war kale. Xeerarka Federalku waxay xad u yeelayaan isticmaal kasta oo warka la isticmaalayo si dambi-baadhis loo sameeyo ama talaabo sharci ah laga qaado bukaan aalkolo ama daroogo si xun u isticmaalay.

FARIIMAHA BUUXINTA WARQADDA OGALAASHAHA

Ulajeedo: Isticmaal warqadan marka aad u baahan tahay ogalaasho joogto ah oo aad ku isticmaashid war qarsoodi ah oo ku saabsan macmiil, adiga oo warkaa ugu baahan gudaha DSHS ama si aad warkaa u siisid hay'adaha kale ee isuduwa adeegyo ama loogu baahan yahay daweyn, bixin ama hawlo hay'ad ama ulajeedooyin kale oo raalli u ka yahay sharcigu. Macaamiishu waa dadka gargaar ah adeegyo ka hela DSHS.

Isticmaalka: Buuxi warqadan si elegtaroonig ah hadday suurogal tahay si akhrisku u fududaado. **Waa in warqad gaar ah loo buuxiyo qof kasta, waxana ku jira caruurta.** Ereyga "Adiga" ee ku jira fariimaha waxa loola jeeda shaqaalaha DSHS isla markaana ereyga "adiga" waxa loola jeedaa macmiilka. Wadaagista faylasha waxa ku jira isticmaalka iyo bixinta warka qarsoodiga ah ee ku saabsan macmiilka.

Qaybaha Warqadda:

AQOONSIGA:

- Magaca: Ku qor magaca hal macmiil kaliya warqad kasta. Ku dar wixii ah magacyo u macmiilku hore u isticmaalay markii la siinayay adeegyo.
- Taariikhda Dhalashda: Waxa loogu baahan yahay si macmiilka looga aqoonsado dadka u magac eeg.
- Lambarka Aqoonsiga: Bixi lambarka aqoonsiga macmiilka ama aqoonsi kale sida lambarka sugidda bulshada (social security number) (qasab ma aha) si gargaar looga helo garashada faylashada iyo raadraaca taariikhda iyo adeegyada la helay.
- Adreeska iyo teleefonka: Waa war dheeraad ah oo gargaar ka geysan doona helista iyo garashada ama la-xidhiidhista macmiilka.
- Wax kale: Sanduuqan ku soo dar wixii ah war dheeraad ah oo laga yaabo inu gargaar ka geysan karo helista faylasha oolli kara qaybaha DSHS ee ku lug leh adeegyada, ama helista magacyada xubnaha qoyska, ama warkii kale ee waxtar leh.

OGALAASHO (AMAR-SIIN):

- Hay'adaha ama dadka faylasha isweydaarsanaya: Marka u macmiilku buuxiyo warqadan waxay taasi ogalaanaysaa isticmaalka iyo wadaagista warka qarsoodiga ah oo lagu isticmaalo gudaha dhamaan DSHS. Waxa DSHS ay awoodi doontaa inay bixiso iyo inay ka hesho war qarsoodi ah hay'adaha dibadda ama dadka liiska lagu qoray. Bixi war lagu garanayo hay'adaha ama adeeg-bixiyeyaasha, uuna ku jiro magac, adrees ama goob deganaansho haddii taasi suurogal tahay. Waxa kale oo aad soo raacin kartaa liiska hay'adaha loo ogolyahay inay wadaagaan warka ay qasab tahay in macmiilku sidoo kale saxeexo.
- Warka lagu soo daray: Macaamiishu waa inay muujiyaan faylasha khuseeya ogalaashaha. Macaamiishu hadday doonayaan faylasha oo dhan way fasi karaan ama xad bay u yeeli karaan faylasha lagu soo darayo fasaxa iyadoo la isticmaalayo taariikh, nooc iyo goobta u faylku ka yimi. Haddii u macmiil aanuu saxeexin ogalaasho ama aanuu cadeyn fayl gaar ah, waxa dhici doonta in wadaagista faylkaa la ogalaan doono haddii u sharcigu ogolyahay. Waxa aad ku soo dari kartaa liiska faylasha arrintu khusayso ee loo baahan yahay in macmiilku saxeexo. Haddii ay jiraan faylal u ku jiro war ku saabsan caafimaadka maskaxda (RCW 71.05.620), baadhitaanka ama daweynta HIV/AYDHIS ama Cudurada Galmada (STD) (RCW 70.02.220), ama adeegyada daroogada iyo aalkolada (42 CFR 2.31(a)(5)), waa in macmiilku si gaar ah u calaamadeeyo meelahaa si uu u bixiyo ogalaasho ah in la wadaago faylashaa. Warqadani ma baneynayso in lagu soo daro qoraalada daweynta cudurada maskaxda ee hoos yimaada xeerka 45 CFR 164.508(b)(3)(ii) waana in warqad gooni ah la buuxiyo si qoraaladaa loogu soo daro.
- Mudo: Ku dar taariikhda dhicitaanka ogalaashaha loo adeegsanayo ulajeedooyinka barnaamijkaaga ama hadba sida u sharcigu farayo.
- Fahmidda: U hubso in macmiilka fahmay wuxu yahay ogalaashaha la bixinayo iyo sida iyo sababta warka loo wadaagi doono. Haddii loo baahdo, isticmaal warqad la tarjumay iyo turjubaan ama warqadda kor u akhri. Haddii u macmiilku u baahan yahay war dheeraad ah, bixi koobi labaad oo ah Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee DSHS (DSHS Notice of Privacy Practices) ama u gudbi macmiilka sarkaalka bixinta warka dadweynaha ee qaybtaada qaabilsan.

SAXEEXYADA:

- Macmiil: Macmiilka ama ilmo dhaafay da'da ogalaashaha bixinta (waa 13 marka laga hadlayo adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada daroogada iyo aalkolada; waa 14 marka laga hadlayo HIV/AYDHIS iyo Cudurada Galmada (STD) ee kale; waana da' kasta markay tahay xad-u-yeelista dhalmada iyo ilmo-ka-saarista; waa 18 markay tahay daryeelka caafimaadka iyo faylasha kale) ha saxeexo sanduuqan hana qoro taariikhda saxeexa. Macmiilku wuxu saxeexa ku badali karaa calaamad aad markhaati ka ahaatid.
- Wakiilka Hay'adda ama Markhaatiga: Adiga ayaa saxeexi kara sanduuqan haddii aad tahaay qofka warqadan macmiilka u soo bandhigaya una sharaxaya. Fadlan ku dar lambarka teleefonkaaga. Haddii u macmiilku wax ku saxeexi doono meel ka baxsan xafiiska, u sheeg macmiilka inu markhaati u saxeexo bartan qorana lambarka teleefonkiisa. Qof ah nootaayo dadweyne ayaa markhaati ka noqon kara saxeexa macmiilka.
- Waalid ama Wakiil Kale: Haddii u macmiilku yahay ilmo ka yar da'da ogalaasho bixinta, waa in waalid ama qof masuul ka ahi saxeexo. Haddii ay dhacdo in ilmuhu aanuu ka soo baxaynin da'da ogalaasho bixinta ee dhamaan faylasha la wadaagayo, waa in ilmaha iyo waalidkuba wada saxeexaan. Haddii maxkamadi cadeysay inaan sharci ahaan macmiilku masuuliyad qaadi karin, waa in qofka masuulka ka ah ee maxkamadu u magacawday saaxeexo keenona koobiga amarka magacaabista. Haddii u qof kale saxeexayo iyadoo ay sabab kale jirto (oo ay ku jirto qof la siiyay ogalaasho wakiilnimo "power of attorney" ama wakiil qof geeriyooday "estate representative"), calaamadee "cid kale" waana inaad heshid koobiga amarka sharciga ah ee wakiilnimada. Waa in qofka saxeexayaa u qoro taariikhda saxeexa isla markaana qoro lambar teleefon ama warka la-soo-xidhiidhista.